

Sida La Is Kaga Baaro Caabuqa Koofid-19 COVID-19 Testing Before Surgery



Qof kasta oo u ballansan qalliin laga maarmi karo waxaa ku **waajib ah in laga baaro caabuqa koofid-19** inta aan la qalin ka hor.

Caafimaadkaaga iyo badbaadada shaqaalahayaga awgeed:

- ➔ 3 ilaa 4 maalmood qalliinkaaga ka hor, waa in aad iska baartid caabuqa Koofid-19.
- ➔ Waa in aad dadka kale ka fogaatid 14 maalmood qalliinka ka hor (ama intii suurtagal ah, haddii ballanta qalliinku ka dowdahay 14 maalmood).
- ➔ La xiriir dhakhtarkaaga qalliinka haddii caafimaadkaagu isbaddalo oo aad jiratid.

Meesha la is kaga baaro caabuqa koofid-19

Ka raadi liiska xarumaha uruurinta baaritaanada caabuqa koroonaafayras (COVID-19) bartaan internetka fraserhealth.ca/COVID19testing ama iskaan-garee calaamadda lambarkaan Jawaabta Deg Degga ah (scan this QR code).

Waxaan aad uga shaqaynaa in aan caabuqa ka baarno dadka ugu tira badan ee suurtagalka ah maalin walba.

Ballan ku qabso khadka internetka (waa sida ugu fiican). Waxaad kaloo ballan ku qabsan kartaa telefoon.

▪ Ballanta lagu qabsado khadka internetka

Booqo barta internetka fraserhealth.secureform.ca ama iskaan-garee calaamadda lambarkaan Jawaabta Deg Degga ah (scan this QR code).

Haddii aad arki weydid maalintii ama wakhtigii aad rabtay ballanta oo bannaan, hadba dib u fiiri marar kale. Fursado bannaan ayaa soo baxa waxaan soo gudbinaa wakhtiyada lagu daray maalintaas oo dhan.

- **Ballanta lagu qabsado khadka telefoonka** 8:30 a.m. ilaa 4:30 p.m., maalin kasta 604-587-3936
Wixii caawin buuxinta foomka ballan qabsashada khadka internetka ama ballan kuu qabashaa.

Sida loo helo natiijooyinkaaga baarista caabuqa

Si aad natiijooyinkaaga ugu hesho sida ugu dhakhso badan:

- **Fariin qoraal ah:** Booqo bartaan internetka results.bccdc.ca ama iskaan-garee calaamadda lambarkaan Jawaabta Deg Degga ah (scan this QR code)

- **Irrid Caafimaad:** Booqo bartaan internetka healthgateway.gov.bc.ca ama iskaan-garee Calaamadda lambarkaan Jawaabta Deg Degga ah (scan this QR code)

Qof kasta oo haysta Kaarka Adeegyada Biritish Kolombiya ee masawirka leh (photo BC Services Card) wuxuu natiijooyinka ku heli karaa farriin qoraal ah ama iimeyl.

- **Xisaabta xogta caafimaadkayga internetka [My ehealth (da'da 16 iyo ka weyn)]:** Waxaad ka furataa xisaabta xogta caafimaadkaaga bartaan internetka myehealth.ca (Create an account at myehealth.ca)

▪ Khadka telefoonka Natiijooyinka

Taban ee baarista caabuqa Koofid-19: 8:30 a.m. ilaa 4:30 p.m. maalin kasta 1-833-707-2792

Calaamadda lambarka jawaabta deg degga ah (QR code) waa nooc calaamad lambar oo aad kaamarada telefoonkaaga ku iskaan-garayn kartid.
Markaad iskaan-garaysid, waxay ku geyneysaa boggaas internetka.

www.fraserhealth.ca

Xogtaanu baddali mayso talada uu ku siiyo dhakhtarka daryeelka caafimaadkaagu.